

Canshuurta Hantida ee La Dhimay

Canshuurta Hantida ee La Dhimay ee Vermont ayaa ka caawisa dad badan oo reer Vermont inay bixiyaan canshuurta hantidooda. Waxaad u qalmi kartaa cashuurta hantida ee la dhimay haddii hantidaadu u qalanto sida gurigaaga iyo aagga ku hareeraysan aadna buuxiso shuruudaha u qalmitaanka. Lacagta ugu badan ee laga dhimi karaa waa \$5,600 qeybta canshuurta hantida ee Dawladu ku bixiso waxbarashada iyo \$2,400 qaybta canshuurta hantida ee lagu maalgaliyo degmada.

U qalmitaanka

Si aad u codsato in lagaa dhimo canshuurta hantidaada dulsaaran, waa in aad buuxisaa DHAMMAAN shuruudaha uqalmitaanka ee soo socda:

- Hantidaadu tahay guri iyo aag ku hareeraysan, aadna gudbisay Bayaanka Caddaynta Guriga si gurigaagu qayb uga noqdo liiska guryaha sannadkaa la cashuurayo.
- Aad daganayd Vermont sannad canshuureedka oo dhan.
- Aan lagu sheegin inaad ku tiirsanaan tahay canshuur bixiye kale.
- Aad lahayd aadna daganayd dhulka asaga oo guri kuu ah laga soo bilaabo Abriil 1.
- Haddii aad buuxiso shuruudahan, marka laga reebo in gurigaaga laga kireeyay kirayste ilaa 1-da Abriil, weli waxaad sheegan kartaa inuu gurigaaga yahay haddii aan la kiraynin wax ka badan 182 maalmood sannadkaa sheegashada.
- Aad buuxiso shuruudaha dakhliga qoyska (eeg foomka dakhliga u cayiman ee sannadkaan).

Sidee loo codsadaa

Waxaad u baahan tahay inaad soo gudbisno labada foom ee soo socda si aad u codsato canshuurta hantida ee la dhimay. Waxaad soo gudbin kartaa sheegashadaada si elektronikaga adoo isticmaalaya MyVTax taasoo ah soo gudbin kaligeed ah ama marka aad soo gudbinayso canshuur celinta Dakhliga ee Vermont.

- Foom HS-122, Bayaanka Guriga iyo Sheegashada Dhimista Cashuurta Hantida
- Faqradda A: Bayaanka Guriga
- Faqradda B: Sheegashada Dhimista Canshuurta Hantida
- Jadwalka HI-144, Dakhliga Guriga. Baro sida loo go'aamiyo dakhliga gurigaaga.

Sanad Canshuureedka: 2023 Dakhliga Ugu badan ee Qoyska: \$128,000

Sanad Canshuureedka: 2022 Dakhliga Ugu badan ee Qoyska: \$134,800

Sanad Canshuureedka: 2021 Dakhliga Ugu badan ee Qoyska: \$136,900

Sanad Canshuureedka: 2020 Dakhliga Ugu badan ee Qoyska: \$138,500

Sanad Canshuureedka: 2019 Dakhliga Ugu badan ee Qoyska: \$138,250

Sanad Canshuureedka: 2018 Dakhliga Ugu badan ee Qoyska: \$136,500

Sanad Canshuureedka: 2017 Dakhliga Ugu badan ee Qoyska: \$147,500

Sanad Canshuureedka: 2016 Dakhliga Ugu badan ee Qoyska: \$141,000

Taariikhaha

Taariikhda lagu soo gudbinayo canshuuraha baaqday ee Sheegashada Dhimista Canshuurta Hantida waxay lamid tahay taariikhda soo gudbinta canshuur celinta Canshuurta Dakhliga ee Vermont iyo Bayaanka Guriga, taasoo sida caadiga ah ku beegan 15ka Abriil ah. Haddii aad soo gudbinayso Bayaanka Guriga oo taariikhda Oktoobar 15 oo ah taariikhda dambe ee lasoo gudbinayo, waxaad wali codsan kartaa Dhimista Canshuurta Hantida 31-ka Maarso ee sanadka soo socda. Si kastaba ha ahaatee, khidmad adeeg oo \$150 ayaa laga jari doonaa dhimista canshuurta hantida. Kadib 15-ka Oktoobar, qiimo dhimis wal oo canshuurta hantida ah waxaa si toos ah loogu dirayaa mulkiilaha guriga loona diri maayo magaalada.

Wax ka badalka Sheegashada

Haddii aad soo gudbisay Sheegashada Dhimista Canshuurta Hantida oo ay la socoto Bayaanka Guriga, waxaa lagu ogolyahay inaad wax ka badasho ama isbadal ku samayso macluumaadka soo socda ee kujira foomamka HS-122, Bayaanka Guriga iyo Sheegashada Dhimista Canshuurta Hantida iyo HI-144, Dakhliga Qoyska, haddiiba wax ka badalada lagu sameeyay saddex sanno gudahood marka laga eego taariikhda bisha Abriil ee la rabay in la gudbiyo:

- dakhliga qoyska,
- qiimaha dhulka gurigu ku fadhiyo,
- canshuurta dhulka gurigu ku fadhiyo ee waxbarashada lagu maalgaliyo,
- canshuurta dhulka gurigu ku fadhiyo ee degmada lagu maalgaliyo, iyo
- boqolkiiba inta uu leeyahay

Haddii aadan soo gudbinayn canshuur celintaada wax laga badalay oo elektoroonik ah, waxaad isticmaali kartaa Jadwalka HI-144, Dakhliga Qoyska, ee sannadkaas khuseeya si aad wax uga badasho dakhliga qoyska. Geli dakhliga qoyska ee saxda ah waxaadna ku saxdaa AMENDED-ta ku dul qoran HI-144. Si gaar ah usoo dir HI-144 oo ka duwan canshuur celin kale oo Waaxda loo soo gudbiyay.

Ugusoo dir boostada :

Vermont Department of Taxes

P.O. Sanduuqa 1645

Montpelier, VT 05601-1645

Foomka Canshuurta iyo Tilmaamo

Tilmaamaha MyVTax

- [Tilmaamaha myVTax Sida loo Gudbiyo Bayaanka Guriga ama Sheegashada Dhimista Canshuurta Hantida \(myVTax Guide How to File a Homestead Declaration or Property Tax Credit Claim\)](#)

Foomamka Canshuurta iyo Tilmaamaha

Hoos ka eeg foomamka, tilmaamaha, iyo xisaabiyaha canshuurta hantida oo ay waaxda ay bixiso iyadoo tan ku caawinaysa cashuur bixiyaha iyo diyaar garoobayaasha si ay qiyaasayeen lacagta laga Dhimayo Canshuurta Hantida ee canshuur bixiyuhu heli karo sanadka canshuurta hantida soo socda.

- [Buugga Cashuurta Dakhliga ee Vermont: Buuggan waxa uu ka mid yahay foomamka iyo tilmaamaha loogu talo galay: IN-111, IN-112, IN-113, IN-116, HS-122, RCC-146, HI-144 \(Vermont Income Tax Return Booklet: This booklet includes forms and instructions for: IN-111, IN-112, IN-113, IN-116, HS-122, RCC-146, HI-144\)](#)
- [HS-122, HI-144, Bayaanka Hantida ee Vermont IYO Sheegashada Dhimista Canshuurta Hantida \(HS-122, HI-144, Vermont Homestead Declaration AND Property Tax Credit Claim\) iyo Tilmaamaha\(Instructions\)](#)
- [HS-122, Xisabiyaha Dhimista Canshuurta Hantida \(HS-122, Property Tax Credit Calculator\)](#)
- [HS-122W, Bayaanka Caddaynta Guriga iyo/ama Lasoo Bixista Dhimista Canshuurta Hantida \(HS-122W, Vermont Homestead Declaration and/or Property Tax Credit Withdrawal\)](#)

Xaqiiqda iyo Tilmaamo

- [Sharciyada Canshuurta iyo Qarsoodida Macluumaadka Waxka Badalka Canshuurta Hantida \(Tax Bills and Confidentiality of Property Tax Adjustment Information\)](#)
- [Dhimista Canshuurta Hantida Vermont \(The Vermont Property Tax Credit\)](#)
- [Property Vermont Bill Backer \(Vermont Property Bill Backer\)](#)
- [Jadwalka Vermont HI-144: Go'aaminta dakhliga guriga \(Vermont Schedule HI-144: Determining Household Income\)](#)
- [Xogta Canshuurta Vermont ee Milkiilayaasha Guryaha oo ku leeyihiin heshiis laabka guryaha \(Vermont Tax Information for Owners of Housing Subject to a Housing Subsidy Covenant\)](#)
- [Askarta hore iyo Canshuurta Hantida: Waxaa Loo baahan yahay inaad Ogaato \(Veterans and Property Taxes: What You Should Know\)](#)

Shuruucda, Xeerarka, iyo Qawaaniinta

- [Xeerka § 1.5401 \(7\) Guriga \(Regulation § 1.5401\(7\) Homestead\)](#)
- [Xeerka § 1.5811 \(11\) \(A\) \(i\), §1.5401 \(7\), \(14\), §1.6066 \(c\) Deegaanka \(Regulation § 1.5811\(11\)\(A\)\(i\), §1.5401\(7\), \(14\), §1.6066\(c\) Domicile\)](#)
- [Warbixinta Farsamada 20: Sheegashada Isirka\(Technical Bulletin 20: Claims of Decedents\)](#)
- [Warbixinta Farsamada 51: Waxka Badalka Lagu Samaynayo Jadwalka Dakhliga Guud HI-144 \(Technical Bulletin 51: Adjustment to Modified Gross Income Schedule HI-144\)](#)
- [Warbixinta Farsamada 56 \(Dib u eegista\): Warbixinta Dakhliga Ganacsiga, Dakhliga K-1, Dakhliga Kirada iyo Raasamaalka La Helay ee Jadwalka HI-144 Dakhliga Guriga \(Technical Bulletin 56 \(Under Review\): Reporting Business Income, K-1 Income, Rental Income and Capital Gain on Schedule HI-144 Household Income\)](#)